



MA WAXAAD TAHAY QANDARAASLE MADAXBANNAAN MISE SHAQAALE?

GARO XAQUUQDAADA

TAXANAHA

Shirkadaha qaarbaa waxay shaqaalaha usheegaan ineey qandaraasle madaxbannaan yihiin xattaa iyagoo ah run ahaantii shaqaale. Sidaana waxay u yeelaan ineey ka fogaadaan asalka sharciga shaqada ee soo socda iyo ineeyan bixin shaqaalaha faa'iidadooda iyo kharashyo kale. Tani waxaa lagu magacaabaa qalad u sifeyn shaqaale. Garo tallaabooyinka sifeynaya nooca shaqaalaha aad tahay adigoo fahmaya sharciyada difaaca xaquuqdaada.

GARO FARQIGA

Nooca shaqaalaha (aan ahaanno shaqaale ama qandaraasle madaxbannaan) waxay si toos ah u saameeysaa xaqqa aan u leennahay asaasiga xaquuqda shaqo sida mushaharka ugu yar, lacag-bixin saacado dheeraad, difaacidda caafimaad iyo khatar la'aanta, shaqo ka maqnaasho difaacan; xuquuq aadami iyo xaq si wadajir loogu gorgotamo loona galo urur shaqaale.

Nooca shaqaalenimo waxay kaloo saameeysa xuquuqdeena Caymis Shaqo (EI); Qorshe Hawlgabka ee Kanada (CPP); iyo Khatar-la'aan iyo Caymis Rugta Shaqada (WSIB) ama sida caynka loo yaqaan magdhowga shaqaale. Waxay saameeyneeyso sida inaloola dhaqmo dhanka sharciga canshuurta daqli-shaqsiga. Midda kale, nooca shaqaalenimo waxay kaloo saameeynaysaa waxa aan awood uleennahay inaad sameeyno markii mushahar nala siinayo ama shaqada mas'aalooyin xal u bahaan ka dhacaan.

Waxaad shaqaale noqon karta haddi ugu yaraan in ka mid ah arrimahan soo socda sifeynkaraan hawshaada:

- shirkaddu waxay ku siisaa tababarro
- shirkaddu waxaay kugu kormeerta hawshaada
- awood uma lihid inaad iska u maamusho hawshaada, saacadahaaga shaqo ama qiyaasta lacagta aad ku shaqeeyso
- qalabka aad ku shaqeeyso waa kuwo ay shirkaddu leedahay
- mulkiilaha ayaa fa'iidada ama qasaaraha shirkadda leh; shaqaalaha kharash kagama baxayo hawlaha shirkaddu socodkooda kamana soo gaaro fa'iido ka badan musharadda ay ka qaataan
- shaqaalenimadaada si cad ayeey uga mid tahay hawlaha shirkaddu qabato

Waxaad qandaraasle madaxbannaan ama iskii-u-shaqeeyste noqon kartaa haadi qaar ka mid ah arrimahan soo socda sifeeyaan hawshaada:

- waxaad maamulikartaa sida aad hawsha u fulineeyso. Laga yaabe inaad qoroto dad kugu caawina hawsha ee aad adiga tahay, ma aha shirkaddu, qofka amrikaro
- waxaad xor u tahay inaad ka xaajooto cadadka mushaharka iyo xilliga aad hawsha ku dhammeyn karto
- waa mulkiyaddaada waana mas'uuliyaddaada qalabka aad ku hawsha ku fulineeyso
- adiga ayaa qaadanaya faa'iidada ama khasaaraha hawshaada. Haddii ay faa'iido ka timaaddo adaa leh haddii ay qasaaro timaadana adaa leh
- adiga kama mid tahid shirkadda ee waxaad tahay qof u xor ah doorashada cidda aad u shaqeeynayso adigoo isla markaana u shaqeyn kara shirkado kala duwan

Haddii aanan weli kala garan karin farqiga u dhexeeya labada nooc ee shaqaale maxaa nacaya?

Mararka qaarkood ma garankartid haddi aad tahay qandaraasle madaxbannaan ama shaqaale. Matalanba, qofka kuu ah madaxa hawshada ayuu kormeerikaraa adiga oo ku shaqeeynaya qalab mulkiyaddaada ah. Haddaba, arrimahan oo kale malaha keliya hal jawaab ee sax ah. Waxaad waci kartaa XARUNTA WAXQABADKA SHAQAALAH si aad macluumaad uga hesho ku saabsan tabtaad ku kala garan lahayd nooca shaqaalenimadaada.

GARO SHARCIYADA KU BADBAADIYA

Fahan sharciga ku saameeynkaro haddii aad tahay shaqaale ama qandaraasle madax-bannaan. Macluumaadka wuxuu kuugu caawinaya go'aan inaad ka gaarto tallaabooyinka aad qaadayso iyo ciddi aad la xiriireeyso haddi ay shaqada dhibaato ka jirto.

Xeerka Xuquuqda Aadanaha ee Ontariyo

Rugta shaqada waa ka mamnuuc kala-sooc iyo kadeed ku salaysan jinsiyad, midab, assalka, waddanka ssalkaaga, da'da, lab ama dhaddig, cidda aad la galmo-sameeyso; itaal la'aan; qoys-le ama keli ahaad; diinta aad aaminsatahay iyo waddaniyaddaada; iyo cafis qof dambiile ahaa. Shaqaalihii aaminsan in lagu sameeyay kala-sooc ama kadeed ku saleysan xuquuq aadami wuxuu dacwad ka xareyn karaa Maxkamadda Xuquuqda Aadanaha.

Sharciga Amniga iyo Caafimaadka ee Ontariyo

Shaqaalaha iyo qandaraaslaha madaxbannaan waxay labadaba xaq iyo mas'uuliyad ku leeyihiin xaaladda caafimaad iyo amni ee shaqada.

Xeerka Caadi-u-Waafaqsan Shaqada (ESA)

Shaqaaale ahaan waxaad xaq u leedahay inaad kasbato dakhli aan ka yareen mushaar-bixinta ugu yar; inaad shaqeeyso saacado dheeraad ah; fasax aad qaadata mushaarna ku socdo; fasaxa dadka guud ahaan ka wada dhexeeyna qaadata mushaarna kuu socdo; waxaad qaadan kartaa fasax waalidnimo markuu ilmo kuu dhasho. Shaqo difaaca waxaa kaloo ka mid ah adigoo hela magdhow lacag haddii shaqada lagaa cayriyo. Qandaraaslaha madax-bannaan ma helo xuquuqdan saldhigga u ah xeerka shaqada. Shaqaalaha waxay u dacwoonkaraan Wasaaradda Shaqada haddi mushaarkooda ama lacagta laga qabo la siinin. Dacwaddaasi wax kharaj ah lagaama rabidoono.

Qandaraaslaha madax-bannaan waa inuu maxkamad ka dacwodo, bixiyaa qidmado kala duwan isla markaana buuxiyaa waraaqo sharciyeeysan ee dhib badan. Haddii xoogsadaha laga helo dawaddaasi maxkamadda hortaala waxaa laga yaaba inuu xatta bixiyo kharashka uu galay qofkii uu ka dacwoonayey.

Qorshaha Hawlgabka ee Kanada (CPP)

Qorshaha Hawlgabka ee Kanada waxaa loogu talagaly in aan dhaqaale helno goorta aan shaqada ka hawlgabno da', dhaawac ama curyaannimo darteed. Markaad tahay shaqaale, adiga iyo shaqo-bixiyaha waxaad ku biirisaan lacag Qorshaha Hawlgabka ee Kanada. Haddiise aad tahay qandaraasle madax-bannaan keligaa ayaa wada bixindoona Qorshaha Hawlgabka ee Kanada.

Guddiga Badbaadada iyo Caymiska Shaqaalaha (WSIB)

Shaqaaale markaad tahay, shaqo-bixiyahaaga wuxuu dhiibaa lacag-jooqto caymis ah si haddii aad ku dhaawacanto shaqada ama aad xanuunsato magdhow lacageed lagu

siyo. Qandaraasle madax-bannaan marka aad tahayse adiga ayaa ka mas'uul ah inaad bixiso lacagta caymiska ee Guddiga Badbaadada iyo Caymiska Shaqaalaha (WSIB).

Caymiska Shaqada (EI)

Haddii aad shaqaale tahay, adiga iyo shaqo-bixiyaha waxaad bixineysaan lacagta caymiska shaqada. Shaqo la'aan haddaad noqoto ama ubaahato munaafacaad kale waxaad codsankartaa munaafacaadka Caymiska Shaqada (EI). Haddii aad tahay qandaraasle madax-bannaan ma aad lahid munaafacaad Caymiska Shaqada markay shaqo-la'aan kuugu dhacdo. Hase-yeeshee, wxaad helikartaa munaafacaad gaar ka ah (umulidda; xanuunka; waalidnimada u gargaaridda qaraabo xanuunsan keliya). Ka qaybgelidda munaafacaadkan qayaxan waa mid aad iskaa u sameeysanaysid. Si aad u noqoto qof xaq-u-leh munaafacaadyadan (ee bilaabandoona Janawari 2011) waa inaad:

- heshiis la gashaa Guddiga ee aad biloowdaa lacag bixinta Caymiska Shaqada (arjiga waxaad ka heleeyso qadka interneetka ama Adeegga Kanada);
- inaad tahay Kaneediyaan ama qof daggane rasmi ku ah Kanada

Canshuurta Dakhliga (Income Tax)

Shaqaalaha iyo shaqo-bixiyaha waa ineey canshuurta daqliga bixiyaan: Shaqo-bixiyahaaga waa inuu ka jaraa mushaharkaaga canshuurtan markaana uu lacagta dawladda kaa shubaa. Qandaraasle madax-bannaan markaad tahay waxaad caddeeynaysa dakhligaaga kana bixineysa canshuurtan adigoo si toos ah u dawladda u siinaya.

Qandaraaslaha madax-bannaan wuxuu hawshiisa kharashka la xariira inta badan ka jarikaraa dakhliga uu canshuurta dawladda ka bixinaayo (sida kharashka uga baxa baasiinka gaarigiisa ama taleefoonnada gacanta ee uu isticmaalo) taana macnaheeda waxay tahay in mararka qaarkood ay bixiyaan canshuur yar. Shaqaalahaba mararka qaarkood waxay canshuurta ka jari karaan kharashyo kooban ee shaqadooda la xiriira. Waxaa aad muhiim u ah inaad hubto nooca shaqaale ee aad tahay.

Canshuurtaada haddii aad ku xareeysay qandaraasle madax-bannaan ahaan ee aad caddeeysay kharashka la xiriira hawsha aad qabato waxaa laga yaaba inaad lacag canshuurta dib usoo celiso markaad ogaato inaad runahaanti tahay shaqaale mushaharle ah.

IS-BADBAADI

Waxaa laga yaabaa inaad ahayn qandaraasle madax-bannaan xattaa adigoo heshiis shaqo saxiixay. Shaqo-bixiyahaaga ogow ma beddelikaro nooca shaqaale aad tahay maxaa yelay intuu mushahar ku siin lahaa wuxuu ku siiyay khidmad sida qandaarsle madax-bannaan. Sida aad u qabato hawsha ayaa xaqiijinkara inaad tahay qandaraasle madax-bannaan ama shaqaale mushaarle ah. Haddii heshiis dhahaya waxaad tahay qandaarsle madax-bannaan lagaa saxiixdo laakin aad dhab-ahaanti tahay shaqaale waa ineeyan run ahaanti kaa dhumin xuquuqdaada shaqaalenimo.

- Marki lagu weeydiyo inaad heshiis saxiixdo waxaad adigana codsataa marka hore inaad hesho muddo aad kaga fiirsato aadna ku fahamto waxa heshiiska ku qoran. Laga yaabee inaad haleelin codsigaaga. Laga yabee ineey madaxdaada kuugu qasabto inaad heshiiska saxiixdo adigoo si fiican uga fiirsan.
- Qor faah-faahinta shaqadaada la xiriirta sida: taariikhda; saacadda; waxaad lacag ahaan ka hesho iyo warbixin ku saabsan hawsha aad maalinwaliba qabato. Raad-reebiddan waxay ku anfacidoontaa markaad u baahato inaad weeydiisato in lagu siiyo lacagta saacadaha dheeradka ah ee aad shaqeysay; fasax mushahar leh amaba lagu siiyo musharka ugu yar ee la baxsho.
- Waa sharci-jabin haddi ay madaxdaadu shaqada kaa cayriso markaad ka hadasho xaquuqdaada, laakin shaqaale badan waa la cayriyaa markay ka hadlaan arrimahan. Tani waxaa lagu magacaaba aarsasho. Raad-uruurin fiican ee shaqadaada la xiriirta waxaa laga yaaba iney dib ku caawinto.
- Shaqaalaha kale la hadal. Waydii haddi ay saxiiseen heshiis la mid ah kaaga. Ka soo qaybgal wacyi-gelin kooxyaha oo ay Xarunta Waxqabadka Shaqaalaha bixiyaan si aad uga barato sidi aad isu badbaadin lahayd.
- Haddi mushaar lagaa qabo u qor warqad madaxdaada adigoo usheegaya ineey bixiyaan inta lagaa qabo. Waxaad kaloo siisaa madaxdaada waqti go'aan ay ku bixiso inta ay kaa qabaan.
- Shaqada haddii lagaa cayriyo, ama lagu qasbo inaad shaqada ka tagto ama sabab kale shaqada lagaaga fariisiyo, waxaa laga yaabaa inaad codsankarto Caymiska Shaqada. Raad-uruurinta la xiriirta shaqadaada ayaa ku caawinikarta inaad hesho munaafacaadka Caymiska Shaqada.
- Wasaaradda Shaqada dacwad ku xaree. Waxaa dhici kara iney kuugu adkaato inaad shaqaale tahay caddeeyso. La xiriir Xarunta Waxqabadka Shaqaalaha si aad gargaar uga hesho.



Steve waa koronto-yaqaan. Hal sano ka badan ayuu shirkad u shaqaynayey. Waxaa loola dhaqmi jiray sida qof shaqaale mushaarle ah. Waqti gaaban ee shaqada laga fariisiyay ka dib Steve shaqadiisi ayuu kusoo noqday. Markaan laakin waxaa Steve lagu yiri inuu yahay qandaraasle madax-bannaan. Shirkaddi waxay joojisay inay bixiso Caymis Shaqo, Qorshe Hawlgab ee Kanada, fasax guud ee lacag laga jarin, fasaxiisa ee lacagaysan, iyo iney ka jarto canshuurta dakhliga. Madaxdiisa uma sheegin Steve abidkiisa maxaa looga beddelay nooca shaqaale uu ahaa waxa heshiis ahna Steve iyo la-shaqeeyayaashiisa abadkood lagama saxiixin. Steve wuxuu aaminsanyahay inuusan ahayn qandaraasle madax-bannaan mana fahamsana waxa uu ka wado madaxdiisa inuu Steve yahay qof cid kale qandaraas ku wareejiyeen. Shaqaale kale oo badan sida Steve waxay runti yihiin shaqaale mushaarle ah laakins la marin-habaabiyay.

TAAGEERO HEL

Workers' Action Centre - Xarunta Waxqabadka Shaqaalaha

Macluumaad ku saabsan xaquuqdaada iyo si aan kuu siino taageero qorshe inaga soo wac Xarunta Waxqabadka Shaqaalaha. Wac (416) 531-0778 ama tag www.workersactioncentre.org

Ministry of Labour - Wasaaradda Shaqada

Macluumaad ku saabsan sidi aad ugu dacwoon lahayd mushahar kaa maqan wac 1-800-531-5551 ama tag www.labour.gov.on.ca.

Ministry of Labour, Occupational Health and Safety Branch - Wasaaradda Shaqada, Waaxda Caafimaadka Hawlgalka iyo Amniga

Macluumaad ku saabsan caafimaadka iyo amniga shaqada wac 1-800-268-8013 ama tag www.labour.gov.on.ca/english

Workers Safety and Insurance Board (WSIB) Guddiga Shaqaalaha Amnigooda iyo Caymiskooda

Macluumaad ku saabsan qaab ama foom, dacwo, munafacaad iyo war raadin kale fadlan waxaad tagtaa www.wsib.on.ca/wsib/wsibsite.nsf/public/Workers wac 416-344-1000 ama 1-800-387-0750

Human Rights Legal Support Centre - Xarunta Sharci Taageera Xaquuqda Aadanaha

Waxaad ka heleleysaa adeegyo sharciyada ku saabsan xaquuqda aadanaha markaad dareento in laguugu sameeyay xaqiraad. Lacag la'aan wac 1-866-625-5179 ama tag www.hrlsc.on.ca

Canada Pension Plan (CPP) - Qorshaha Hawlgab ee Kanada

Fadlan tag www.servicecanada.gc.ca/eng/isp/cpp/cpptoc.shtml si aad jawaabo ee su'aalaha guud ku saabsan munaafacaadka hoos yimaada Qorshaha Hawlgab ee Kanada (CPP).

Service Canada - Adeegyada Kanada

Macluumaad ku saabsan Caymiskaada Shaqo iyo munaafacaad kale ee dakhli ah ee la xiriira markaad tahay shaqaale ama qandaraasle madax-bannaan wac 1-800-206-7218 ama tag www.servicecanada.gc.ca

Revenue Canada (CRA) - Hay'adda Canshuuraha ee Kanada

Macluumaad dheeraad ah eek u saabsan nooca shaqaale ee aad tahay ama canshuur celinta sidaad u codsan lahayd wac 1-800-959-8281 ama tag www.cra-arc.gc.ca/E/pbg/tf/t777/t777-09e.pdf



**416-531-0778 | info@workersactioncentre.org
www.workersactioncentre.org**

Funded by
Financée par



Citizenship and
Immigration Canada

Citoyenneté et
Immigration Canada

Canada